



Gorgortan Ka galida Mudnaanta 2026 ee SEA 03/31/2026

Mushaarka iyo Dheefaha

- Mushahar kaa caawinaya soo jiidashada iyo haysashada macallimiinta wanaagsan, waa mid tartan la leh degmo dugsiyada kuu dhow, wuxuuna la jaanqaadaa sicir bararka nolosha ee ka jirta deegaanka Seattle. Lacag dheeraad ah oo la siiyo qofka markuu waqti dheeraad ah shaqeeyo, mas'uuliyado dheeraad ah uu qabto, hawlo ka baxsan manhajka markuu qabto, iyo waajibaadyo kale.
- Caymis caafimaad oo la awoodi karo oo dhammaan shaqaalaha u qalma ay heli karaan sida ugu dhakhsaha badan, kaas oo ka caawiya dugsiyada inay shaqaaleeyaan oo ay haystaan macallimiin tayo sare leh.

Waxbarid iyo barasho Wax ku ool ah, Taageerooyinka La Siiyo Ardayga, iyo Hawlaha Degmada

- Heshiisyada gorgortanka wadajirka ah waxay macallimiinta ka caawiyaan bixinta waxbarid waxtar leh, xiiso leh, oo tayo sare leh oo taageerta waxbarashada ardayda iyo kobocooda bulsho iyo mida shucuureed.
- Deegaan ku habboon waxbarid iyo barasho wax ku ool ah taas oo bixisa agabyada lagama maarmaanka u ah in barayaashu si siman wax uga qabtaan baahiyaha tacliimeed iyo mida bulsho iyo shucuureed ee ardayda.
- Shaqaaluhu waxay ka qayb qaataan go'aannada heer dugsi iyo heer barnaamij labadaba ee ku saabsan sida loo isticmaalo kheyraadyada, sida loo dejiyo nidaamyada badbaadada, sida loo sameeyo qorshayaasha jawaab bixinta, iyo sida loo qaabeeyo tababarka shaqaalaha iyo horumarinta xirfadeed.
- Mudnaanta la siiyo waqtiga qorsheynta shaqsi iyo iskaashiga, diyaarinta, qiimeynta, iyo horumarinta xirfadeed si loo hubiyo waxbarid tayo sare leh iyo bixinta adeegga.
- Horumar xirfadeed oo khuseeya oo si wanaagsan isu waafajinaya, hagaajiya xirfadaha, dhisa aqoonta, iyo taageera dhaqan wax ku ool ah.

- Waxbarid iyo taageero leh caddaalad iyo sinnaan oo u horseedda natiijooyin wanaagsan ardayda. Shaqaalaysiinta iyo haysashada shaqaalaha ka tarjumaya kala duwanaanshaha bulshooyinka dugsi.
- Goobaha shaqada waxaa loo diyaariyey inay dhammaystiraan waajibaadka shaqo ee lagama maarmaanka ah si loo taageero ardayda iyo hawlaha degmada.

Waxbarashada iyo Adeegyada Gaarka ah

- Aqoonsashada iyo qiimeynta baahiyaha waxbarashada gaarka ah ee ardayda goor hore, iyo bixinta adeegyo joogto ah oo jawaab celin leh oo daboolaya baahiyahaas.
- Qaab-dhismeedyada iyo hababka taageera badbaadada ardayda iyo shaqaalaha oo fududeeya natiijooyinka wanaagsan ee ardayda iyadoo la adeegsanayo qaab waxbarasho oo loo dhan yahay.
- Ururinta xog tayo wanaagsan leh iyo keenista manhaj la waafajiyay oo ay sameeyeen barayaasha SEA oo sida fiican loo tababaray.
- Waqti loo baahan yahay in la qorsheeyo lana hagaajiyo manhajka, la qoro IEP-yada, lana abuuro tilmaamo si gaar ah loo nashqadeeyay (SDI) oo raacaya shuruudaha sharciga ah isla markaana taageera shaqa kooxeedka laga qabto goob waxbarasho oo loo dhan yahay.

Xuquuqaha qofka ku leeyahay Goobta Shaqada

- U adeegsiga xuquuqda hab-raaca sharciga ah si joogto ah, caddaalad ah, iyo sinnaan ah, iyo la wadaagista macluumaadka waqtigii loogu talagalay si SEA ay u gudato waajibaadkeeda matalaadda, u xalliso khilaafaadka si dhakhso ah, una yareyso khilaafaadka.
- Deegaan waxbarid iyo mid waxbarasho oo ammaan ah, taageera kala duwanaanshaha, oo qiimeeya sinnaanta. Ilaalinta xuquuqda aadanaha ee shaqaalaha iyo amniga shaqada marka ay la kulmaan falal sharci darro ah ama faragelin xad dhaaf ah oo ay dowladdu sameyso.
- Luqad cad oo si fudud loo fahmi karo oo labada dhinacba ka caawisa inay is fahmaan oo ay yareyso khilaafaadka.